



Derry City & Strabane
District Council
Comhairle
Chathair Dhoire &
Cheantar an tSráthá Bán
Derry City & Strabane
Destrick Council

T:buc
Changing for the better, together

Magaalada Derry iyo golaha deegaanka ee
demgada Strabane

Hagaha dadka cusub



Tusmada

Hordhac	3
Bulsho kala duwan	4
Muxuu yahay Golaha deegaanka ee degmada Strabane iyo magaalada Derry?	5
Leisure Centres	6
Jardiinooyinka/Baarkinada iyo garoomada ciyaaraha	7
Qashinka iyo dib u warshadaynta	8
Kooxda Xidhiidhka wanaagsan	10
Gaadiidka	11
Dukaamaysiga	13
Ururada taageerada	15
Adeega daryeelka Caafimaadka	16
Dugsiyada, waxbarashada, Cibaadada iyo Booliska	17
Luuqada Ingiriisida	18
Adeega talo bixinta	19
Khariirada	20

**Missing
translation**



Hordhac

Ku soo dhawoow Degmada Derry iyo Golaha Degmada Strabane. Wuxaan rajaynaynaa inaad deegaankayaga ka heli doonto meel wanaagsan oo aad ku noolaato. Buugyarahen macluumaaadku waxa uu qeexayaa qaar ka mid ah macluumaaadka aasaasiga ah ee ku saabsan nolosha halkan. Wuxaan rajaynaynaa inay kaa caawin doonto inaad degto oo aad dareento qayb ka mid ah bulshadayada aad la nooshahay.

Halkee ayay ku taalaa magaalada Derry iyo xarunta golaha deegaanka degmada strabane?

Xarunta golahayagu waxay ku taal jasiiradda Ireland – oo ku taal Waqooyi Galbeed ee Waqooyiga Ireland (qaybta midabka buluuga ah la mariyay ee khariidada hoose ku taal). Waqooyiga Ireland waa qayb ka mid ah Boqortooyada Ingiriiska.



Magaalada Derry (oo sidoo kale loo yaqaan Londonderry) waa magaalada labaad ee ugu weyn Waqooyiga Ireland waxayna 90 daqiiqo u jirtaa Belfast. Ilaa 110,000 oo qof ayaa ku nool magaalada.



150,100 qof ayaa ku nool aagga golahayaga. Sidoo kale magaalada muhiimka ah ee Derry-Londonry wuxaan sidoo kale leenahay magaaloojin muhiim ah sida Strabane iyo tuuloojin badan iyo meelo miyi ah. Webiga Foyle waa webi weyn oo dhix mara magaalada iyo deegaankaba. Buuraha Sperrin ee bariga aagga golahayaga ayaa ku fiican socodkqa iyo muuqaalada indhaha u fiican. Magaalada, aagga daanta galbeed ee wabiga Foyle waxaa loo yaqaan ‘Cityside’ halka aagga daanta barina loo yaqaan ‘Waterside’.

Bulsho kala duwan

Dadka ugu badan ee ku nool deegaankan waxay asal ahaan ka soo jeedaan caddaan, Masiixi (Protestant ama Catholic), waxaanay ku hadlaan oo luuqada koowaad u ah Ingiriisi. Dadka qaar ayaa isku aqoonsan doona inay yihiin 'Irish' kuwa kalena waxay isu aqoonsan doonaan inay dhalasho ahaan 'British' yihiin. Woqooyiga Ireland waa goob yar, laakiin waa goob gaar ah oo dadka ku dhashaa ay haystaan doorasho ah inay go'aansan karaan inay noqdaan Irish ama Ingiriis (ama mararka qaarkood labadaba). Labadan caadooyinba waxay leeyihii aqoonsiyo dhaqameed oo cajiib ah xagga muusikada, qoob ka ciyarka, luqadda iyo waxyaabo kale oo badan!

Qiyaastii ahaan 2-3% boqolkiiiba dadkeena waxay kasoo jeedaan meelo kale. Wuxaan haynaa tiro badan oo dad ah oo ka soo jeeda Polish, Shiiinaha, Hindi, Filibiin, Afrikaan iyo jinsiyado kale. Marka laga hadlayo dhanka diinta, waxa ku yaala kaniisado badan oo Masiixiyiin ah, waxaa sidoo kale jira Muslim, Hindu, Sikh, Bahá'í, Buddhist iyo bulshooyin kale oo caqido aaminsan iyo sidoo kale dad aan aaminsanayn wax diin ah.

Waxa jira ku dhawaad 20 koox-bulsheed oo laga sameeyay gudaha kuwaas oo matala dadka ka soo jeeda qowmiyadaha tirada yar. Waxaa laga yaabaa inaad la kulanto qaarkood goor hore waqtigii aad halkan timid.

Waxa kale oo jira ilaa 400 oo koox-bulshada guud iyo kooxo badan oo isboorti iyo dhaqameed oo deegaankeena ka jira - halkan waxaa ka jira dareen bulsho oo xooggan! Deegaanka aad ku noolaan doonto waxaa laga yaabaa in uu leeyahay xarun bulsheed lagu kulmo iyo qaar ka mid ah shaqaalahu bulshada kuwaas oo maamula dhammaan noocyada kala duwan ee barnaamijyada bulshada, waxaanad dooran kartaa inaad ka qaybgasho barnaamijyadaas. Si kastaba ha ahaatee, haddii aadan rabin inaad ka qaybgasho, marnaba ma jiraan wax cadaadis ah oo lagugu saarayo inaad ka qaybgasho.

Xuduuda aan la leenahay Jamhuuriyada Ireland

Juquraafi ahaan degaankaankaygu aad buu ugu dhow yahay xadka u dhixeyya Ingiriiska iyo Jamhuuriyadda Ireland. Tani waa xuduud aad u furan oo dad badan oo deegaanka ahi ay si joogto ah uga gudbaan (xitaa way ka gudbaan si ay ugu safraan shaqadooda).

Aagga Safarka ee la wadaago (Common Trade Area) waa heshiis u dhixeyya Boqortooyada Ingiriiska, Kutiirsanaanta Boqortooyada (Bailiwick of Jersey, Bailiwick of Guernsey iyo Isle of Man) iyo Ireland. CTA waxay u ogolaataa muwaadiniinta Ingiriiska iyo kuwa Irishka inay si xor ah u guuraan labada jasiiradoo hubin la'aan. Muwaadiniinta CTA waxay ku noolaan karaan, ka shaqayn karaan, ka codayn karaan oo ay heli karaan dheefaha labada gobolba.

Waxaad ogaataa in qof kasta oo halkan ku nool uusan heli karin xuquuqahan si ay uga gudbaan xadka Ireland iyo UK oo ay ku jiraan Woqooyiga Ireland iyo Jahuriyada Ireland. Liiska kuwa loo diiday inay ka gudbaan xadka, waxaa ka mid ah qaxootiga haysta 'Leave to Remain'/ Fasaxa aan xadidneyn ee joogitaanka (ogolaansho ka yimid dowladda inay sii joogaan wadan aan xad lahayn); Magangalyo doonka; Shaqaalahu soogalootiga ah ee ka yimid Afrika, Aasiya iyo waddamo kale oo aan Yurub ka tirsanayn oo haysta Fasaxa aan xadidnayn ee ay ku joogaan; Shaqaalahu soogalootiga ah ee ka yimid Afrika, Aasiya iyo wadamada kale ee aan Yurub ahayn ee haysta deganaanshaha joogtada ah ee Jamhuuriyada Ireland, dadka fasaxa u haysta inay ku noolaadaan, ka shaqeeyaan oo wax ku bartaan Woqooyiga Ireland ama Jamhuuriyada Ireland iyo dadka ku guursaday UK ama Muwaadin Irish ah. Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan booqo shabakadaha soo socda:

Guddiga maamulka Garsoorka - <https://caj.org.uk/>
or **North West Migrant Forum - <https://www.nwmf.org.uk/common-travel-area/>**



Maxay tahay degmada Derry iyo golaha degmada Strabane?

Degmada Derry iyo Golaha Degmada Strabane waa dawlada hoose ee degaanka aad ku noolaan doonto. Golaha deegaanku waa urur awood u leh inuu go'aamo badan ka gaadho deegaanka. Si dimuqraadi ah ayaa loo doortay. Dawlada hoose siyaasiyiinta la soo doorto waxa loogu yeedhaa 'xilidhibaan gole deegaan'. Magaalada Derry iyo Degmada Strabane waa mid ka mid ah 11ka gole ee Waqooyiga Ireland. Goluhu waxay masuul ka yihin adeegyada iyo go'aamada kala duwan kuwaas oo saameeya nolosha deegaankeena.

Waxaanu laba xafiis oo waawayn ku leenahay

Derry Office

98 Strand Road
Derry, BT48 7NN
Tell: **(028) 7125 3253**

Strabane Office

47 Derry Rd
Strabane, BT82 8DY
E: info@derrystrabane.com

Adeega golaha

Waxaa jira adeegyo aad u badan oo golahani qabo kuwaasi oo aanu dhamaantood kuugu sharaxi karno halkan, laakiin hoos waxaa ku yaal maclumaad ku saabsan adeegyada oo laga yaabo inaad si caddaalad ah ku dhisan hesho dhawaan.



Xarumaha madadaalada

Xarunta Foyle Arena - Waa goob ciyaareed iyo xarun lagu qabto munaasabadaha taasi oo leh barkado lagu dabaasho, tas-hilaad ciyaareed, goobo xafladeed iyo darbi la fuulo. Kala xidhiidh taleefankan: 028 7137 6555.

Xarunta Templemore Sports Complex - waxay bixisaa tas-hilaadka ku saabsan ciyaaraha gudaha iyo dibadda, oo ay ku jiraan orodka 400m, barkadaha dabaasha, iyo garoommada cawska. Taleefankan kala xidhiidh: 028 7137 6585.

Xarunta Brooke Park Leisure Centre - waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo gudaha iyo dibadda ah sida ciyaarta squash courts iyo qolka uumiga. Taleefankan kala xidhiidh: 028 7126 2637.

Garoonka ciyaaraha ee Ryan McBride Brandywell - Hoyga Kooxda Kubadda Cagta ee magaalada Derry City iyo garoonka tartanka ee Brandywell Greyhound, Xaruntu waxay ku agtaallaa Garoonka Kubadda Cagta ee Brandywell.

Waxa kale oo jira 3 xarumood oo lagu qaato wakhtiga firaqaqada iyo raaxaysiga - **Xarunta firaqaqada ee Dooxada Derg, Xarunta madadaalada ee Riversdale** iyo **Xarunta ciyaaraha ee Melvin** oo ku yaal aagagga Strabane iyo Castlederg ee ka baxsan magaalada. Waxa jira fursado badan oo aad kaga qayb qaadan karto ciyaaraha kala duwan ee deegaankayaga. Haddii ay jirto ciyaar aad jeceshahay, fadlan na waydii oo waxaan isku dayi doonaa inaan ku helno meel aad kala xidhiidho!



Baarkinada iyo garoomada ciyaaraha

Goluhu waxa uu maamulaa Baarkino/jardiinooyin badan oo deegaanka ku yaala iyo garoomo lagu ciyaaro. Kuwan waa bilaasha, waana lacag la'aan si loo isticmaalo. Waxa kale oo jira waddooyin socod iyo waddooyin wareeg ah oo agagaarka degaanka ah ku yaala.



Xarunta Guildhall




Guildhall waxay ahayd xarunta nolosha madaniga ah ee magaalada Derry ilaa sanadkii 1890. Waxay hoy u tahay rugta golaha, Parlour Mayor's, xarunta booqashada iyo maqaaaxi bunka laga cabو. Muwaadiniintu waxay Guildhall u isticmaalaan shirarka, aroosyada, iyo munaasibadaha kale. Waxay ku taal badhtamaha magaalada ee Derry-Londonderry. Wuxaan rajeyneynaa inaad mar uun na soo booqan doonto! shaqaalaha addeegyada soo-booqduhu waxay kale oo ay maamulaan fooqa Matxafka ee u dhow Guildhall. Tani waa meel aad ugu wanaagsan dadka waaweyn iyo carruurta si isku mid ah inay wax uga bartaan taariikhda magaalada iyo degmada.



Qashinka iyo dib u warshadaynta

Golaha degmadu waxay qashinka ku ururiyaan weelka qashinka 'wheelie bins' kaasi oo yaala wadada dhinaceeda ama dariiqa cagta ee gurigaaga. Waa inaad kala saartaa qashinkaaga oo aad ku ridaa weelka saxda ah isla markaana hubiso in qashinku si fiican ugu habboon yahay weelka qashinka ee daboolku xidhan yahay. Goluhu ma ururin doono qashinka ku haray bacaha yaala bannaanka haamaha. Goluhu waxa kale oo uu ururin doonaa oo kaliya haamaha qashinka ee ay ku jiraan waxyaalaha saxda ah - markaa ka taxdar gaar ahaan waxa aad ku rido saxanka dib u warshadaynta ee buluuga ah!

Gurigaaga waxaad ku heli doontaa sadex weel qashinka lagu shubo:



Weelka qashinka ee Madaw ama Dameeriga ah

Weelkan waa weel guud oo qashinka lagu rido. Kan waxaad ku shubi kartaa qashinka intiisa badan. Wuxaad u isticmaali kartaa bacaha qashinka aad ku shubtay. Waxa kaliya ee ay tahay inaadan ku shuban weelkan waa qashinka khatarta ah ama khaaska ah sida saliidda baabuurta, baytariyada baabuurta, rinjiga la isticmaalay, qashinka caafimaadka ama caafimaadka, xayawaanka dhintay ama qashinka dhismaha dhismaha.

Weelka Qashinka ee Buluuga ah

Guud ahaan weelkan waxa lagu ridaa qashinka dib u warshadaynta. Waa inaad weelkan ku riddaa qashinkan waxyaabaha soo socda: Warqadaha; kartoonada; gasacadaha/ qasacadaha/ kartoonada / weelasha caaga ah ama dhalooyinka (fadlan dhaq); waxyaabaha la buufiyo ee ay ku jiraan hawooyinka guban kara ; dhalooyin caagga ah; dunta (dhar duug ah); baytariyada iyo biraha.

Waa inaadan ku ridin bacaha qashinka balaastikada ah weelkan qashinka - qashinka waa inuu dabacsan yahay.

Ma gelin kartid waxyaabaha soo socda ee weelkan qashin-qubka: Mashiinnada, baqshadaha leh 'daaqadaha' caagga ah, xafaayadaha, qashinka cuntada, qashinka guud, goyaasha sariirta, qalabka korontada.

Maalinta qashinka ururinta waa inaad qashinkaaga ku afgamisaa geeska si ku habboon oo ah halka uu gaadhigu inta badan istaago. Fadlan gacanta weelka qashin qubka u jeedi dhanka wadada. Tan waa in la sameeyaa sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah maalinta aruurinta qashinka oo aanay ka dambayn 7.30am.

Todobaad kasta mid ka mid ah weelka qashin-qubka ee buluuga ah ama madow ama ka brownka ah ayaa la qaadayaa Faahfaahin dhamaystiran oo ku saabsan ayaa ku jirta website-ka golaha, laakiin talada ugu fiican ayaa ah inaad hoos u eegto jidkaaga oo aad eegto midabka weelka qashinka ee deriskaagu uu soo dhigay todobaadkaas. Mararka qaarkood marka ay jiraan fasaxyo dadweyne maalinta qashinkaaga la qaadayo ayaa laga yaabaa inay isbedelaan. Haddii gurigaagu uusan lahayn qashin waa inaad la xiriirtaa mulkiilahaaga. Waa mas'uulyadooda inay ku siyyaan weel qashin-qub.

Weelka qashinka ee Brown-ka ah

Weelka Qashinka ee brownka ah waa in aad si dabacsan ugu ridaa wasakhda beerta, hadhaaga cuntada (ku xidh weel qashin burburi kara) dambas qabow, warqad jeexan, xaddi yar oo ah hadhaaga xayawaanka (ku xidh weel qashin burburi kara) iyo sidoo kale kaadhka qoyan iyo warqadaha aan lagu ridi karin weelka qashinka ee buluugga ah.

Qashinka iyo dib u warshadeynta



Xarumaha dib u warshadeynta

Goluhu waxa kale oo uu leeyahay goobo badan oo ka mid ah adeegyada madaniga ah. Wuxuu u isticmaali kartaa kuwan inaad qashinka ku tuurto haddii aad hayso ashin aad u badan oo ku habboon qashin-qubka ama haddii aad leedahay noocyoo qashin gaar ah oo aan geli karin weelka qashinka.

Goobaha Madaniga ah waxay ku yaalaan:

- **Xarunta Dib-u-warshadaynta ee ku taala Brandywell, Garoomada Brandywell, wadada Lone Moor.**
- **Xarunta dib u warshadaynta ee ku taala Glendermott, oo ku taala wadada 37 Glendermott.**
- **Xarunta Dib-u-warshadaynta ee ku taala Pennyburn, Cutubka 23, Guryaha Warshadaha ee Pennyburn**
- **Xarunta Dib u warshadaynta ee ku taala Strathfoyle, Waddada Macbadka, Strathfoyle**
- **Xarunta Dib-u-warshadaynta ee ku taala Eglinton, Benbow Ind. Estate, 15 Killylane Road, Eglinton**
- **Xarunta Dib-u-warshadaynta ee ku taala Claudy, Waddada Learmount, Claudy**
- **Xarunta dib u warshadaynta ee Park, Learmount Road, Park**
- **Xarunta dib u warshadaynta ee ku taala Strahan, Strabane**
- **Xarunta Dib-u-warshadaynta ee ku taala Plumbridge, 37 Ligford Rd, Plumbridge**
- **Xarunta dib u warshadaynta ee ku taala Donemana, 226 Berryhill Road, Donemana**
- **Xarunta Dib-u-warshadaynta ee Newtownstewart, ee ku taala Douglas Road, Newtownstewart.**
- **Xarunta dib u warshadaynta ee ku taala Killen, Scraghy Rd, Killen, Castlederg**

In Qashinka la dhigo meel sharci daro ah:

Marka la joogo deegaanka golahayaga kuma daadi kartid qashinka wadooyinka ama meelaha banaan iwm. In qashinka lagu kaydiyo meel sharci daro ah waa dembi waxayna dhaawacdaa deegaanka.

Kooxda Xidhiidhka Toosan



Golaha deegaanku wuxuu leeyahay 4 sarkaal oo ka tirsan Kooxda Xiriirka Wanaagsan. Waa shaqadoodu, waliba si gaar ah waa shaqadoodu (oo ay weheliyaan dhammaan golaha guud ahaan) inay horumariyaan xidhiidhka wanaagsan ee u dhexeeya dadka kala aaminsan diintooda, ra'yiga siyaasadeed iyo kooxda jinsiyada. Waa qayb ka mid ah sharciga halkan in dhammaan ururada dadweynaha ay tan sameeyaan.

Waxa kale oo shaqadayada ka mid ah la shaqaynta dadka ka soo jeeda qowmiyadaha tirada yar iyo dadka haysta diimaha kala duwan. Wuxuu si joogto ah ula xidhiidhnaa kooxaha bulshada ee matala dadka ku nool agagaarka golaha deegaanka. Qayb ka mid ah doorkeena waa in aan kor u qaadno aqbalida kala duwanaanshaha iyo wax ka qabashada nacaybka. Tani waxay ka dhigan tahay inaad u badan tahay inaad had iyo jeer la kulanto qaar ka mid ah xubnaha kooxdayada markaad bilowdo inaad xiriir la sameyso kooxaha bulshada deegaanka.

Kooxdayada waxa lagala xidhiidh karaa ciwaankan **goodrelations@derrystrabane.com**
Taleefan: **028 71 253 253**

Kormeeraha Badbaadada Bulshada

Kormeerayaasha Badbaadada Bulshada waa shaqaale ka tirsan Golaha deegaanka waxaana loo hawlgaliyay inay taageeraan dadka deegaanka si ay ahaadaan kuwa badbaado ku sugar bulashada dhexdeeda. Waxay shaqeeyaan habeenada Khamiista ilaa Axada (5.30pm ~ 3am) iyo maalmaha Isniinta ilaa Arbacada (12 duhurnimo - 5 galabnimo). Waxaa lagula xiriiri karaa telefoon waxayna si degdeg ah uga jawaabi doonaan arrin kasta. Dhammaan kormeerayaasha waa lebisan yihiin markaa si fudud ayaad u aqoonsan kartaa waxaanay ku safraan baabuur sumad leh. Waxay halkaas u joogaan inay ka caawiyaan arrimo kasta oo ku saabsan badbaadada, markaa xor u noqo inaad la xidhiidho si aad ugala hadasho wixii welwel ah ee aad qabto-hana ka baqin haddii aad ku aragto bannaanka iyo hareeraha waddooyinka aad ku nooshahay! Waxay u joogaan inay caawiyaan!

Taleefan: **028 7137 6565 (Xafiiska Derry)** or **028 7138 1333 (Xafiiska Strabane)**.

Kooxaha Booliiska maxaliga ah

Bulshooyinka ku nool Derry City & Degmada Strabane waxay hadda leeyihiin laba Koox Booliis Maxalli ah (LPTs), oo fadhigoodu yahay Strand Road iyo Saldhigiyada Booliiska Strabane, iyagoo bixinaya adeeg nabad ilaalin ah 24 saac taasi oo ay ku daboolayaan s ayu sii wadaan ilaalinta dadka maxalliga ah isla markaana ay ku nabad qabaan degmada oo dhan. Saraakiishan waxa taageeri doona afar Kooxood oo Bilayska Xaafadaha ah (NPTs), oo fadhigoodu yahay Strand Road, Waterside iyo Strabane Saldhigiyada Booliiska, kuwaas oo noqon doona kuwo guuruura oo la geyn doono aagagga si ay wax uga qabtaan arrimaha muhiimka ah.

Halkan ka eeg: <https://www.psni.police.uk/my-area/all-districts/derry-city-strabane/>

Gaadiidka

Basaska

Inta badan degmooyinka iyo magaaloooyinka waxay leeyihii boosteejo wayn oo basaska laga raaco. Basaska badanaa waa habka ugu jaban ee lagu safro (haddii aanad doorbidin inaad socoto ama lugayso!) Saldhigga dhexe ee basaska ee Derry-Londonderry wuxuu ku yaalaa bartamaha magaalada ee Foyle Street, oo ku xigta Guildhall. Jidadka basaska maxalliga ahi waxay ka bilowdaan kuna dhammaadaan halkan. Wadooyinka qaar waxa ay mara wabiga ilaa Waterside iyo gadaal, halka wadooyinka kale ay yihiin siddo ku shaqeeya oo kaliya on Cityside. Kaararka baska, oo ay la socoto macluumaadka safarka, waxaa laga iibsan karaa saldhigga baska ee Foyle Street. Waxaa jira basas caadi ah oo taga Strabane iyo aagagga kale ee golahayaga oo isku xidha aagga golahayaga iyo Waqooyiga Ireland intiisa kale.

Nooca ugu fudud ee tigidhka waa in darawalka baska lagu bixiyo lacag caddaan ah. Si kastaba ha ahaatee waxaad kaydin kartaa lacag haddii aad ogaato xulashooyin kala duwan oo aad si joogto ah u isticmaasho basaska. Kaararka 'safar badan' (haddii aad safar isku mid ah u safarto marar badan) ama kaadhadhka 'Maalinta-soo-celinta' (haddii aad isticmaalayso bas badan hal maalin) waxay ka shaqayn karaan qjimo wanaagsan oo lacag ah iyadoo ku xidhan qorshahaaga safarka. Waxaad kala xiriiri kartaa Translink adiga oo wacaya 028 7126 2261.



Taksiyo

Taksiyada ayaa laga heli karaa magaalada oo dhan waxaana jira shirkado badan oo kala duwan. Safar tagsi ah 5-10 daqiiqo gudaha Derry ~Londonderry ama aagga Strabane waxaad filan karaa inaad bixiso qiyaastii £4 - £6. Dhammaan tagaasida waa in si cad loogu calaamadiyyaa tagsi ahaan.

- **City Cabs: 028 7126 4466**
- **A1 Taxis: 028 7134 2626**
- **Derry Taxis: 028 7126 0247**
- **The Taxi Co: 028 7126 2626**
- **Foyle Taxis: 028 7127 9999**
- **Euro Cabs: 07519 481 210**
- **Strabane Cabs: 028 7188 6660**
- **Sun Taxis: 028 7188 5000**



Tareenada

Boostada tareenku wuxuu ku yaal agagaarka Waterside ee magaalada. Adeegga tareenada ayaa laga heli karaa inta u dhaxaysa Derry iyo Belfast. Tigidhka dadka qaangaarka wuxuu ku kacayaa ilaa £12 wuxuuna qaataa wax ka yar 2 saacadood. Booqo <http://www.translink.co.uk/ Services/NI-Railways/> si aadu ogaato wixii maclumaad dheeraad ah. Waxaa jira meelo kale oo wadada ku teedsan oo laga heli karo adeegan. Aad bay ugu fiican tahay safarka xeebta ee Portrush ee xeebta waqooyi! Si aad ula xidhiidho tareenada NI fadlan wac 028 9066 6630.



Libraries

Libraries are great places! They are open to the public and are free to use for most of their services. Their main service is to lend books – so if you or anyone in your family wants to borrow books for free you should register with your nearest library. All libraries also have WiFi, computers with internet, a photocopier, a scanner, a printer, fax services, and newspapers. Most libraries are open until 17.30 each day and for some time on Saturdays. You need to check their opening hours. Some local libraries are:

Missing translation

- **Derry Central Library, ee ku taala 35 Foyle Street, Derry**
- **Waterside Library, eek u taala 23 Glendermott Road, Derry**
- **Creggan Library, ee ku taala 59 Central Drive, Derry**
- **Shantallow Library, ku taala 92 Racecourse Road, Derry**
- **Strathfoyle Library, ee ku taala 22 Temple Road, Derry**
- **Strabane Library, ee ku taala 1 Railway Street, Strabane**
- **Newtownstewart Library, ee ku taala 2 Main Street, Newtownstewart**
- **Castlederg Library, ee ku taala 1 Hospital Road, Castlederg**

Dukaamaysi


Waxaa jira meelo badan oo laga dukaameysto oo ku yaal agagaarka deegaankayaga. Wuxaa u baahan doontaa inaad dibadda u baxdo oo aad ku wareegto agagaarka aad degan tahay si aad u hesho dukaamada kugu habboon.

Laba ka mid ah xarumaha wax iibsiga ee waaweyn ee bartamaha magaalada waa Foyle Side iyo Xarunta Richmond.

Foyle Side Shopping Centre oo ku taala Orchard Street, Derry BT48 6XY



Richmond Shopping Centre oo ku taala Ferryquay Street, Derry BT48 6PE



Waxaa kale oo jira meelo badan oo laga iibsado tafaariiqda kuwaasi oo ka baxsan magaalada' oo loogu talagalay dukaamaysiga iyo meelaha laga dukaameysto iyo dukaamada gaarka ah ama 'dukaamada koonayaasha ku yaala ee inta badan ku yaala guryaha magaalada iyo degmada. Dukaamada samafalka ah oo aad ka iibsan karto alaab la isticmaalay iyo dhar, sidoo kale waa meelo faa'iido leh oo laga helo alaab laga gorgortami karo. Dadka ayaa dukaamadan ugu deeqa agabka la isticmaalay iyadoo dukaamada ay ku iibyaan qjimo jabon si ay lacag samafal ah uga helaan.

Waxaa jira makhaayado iyo kafateeriyaal badan oo ku yaala magaalada hareeraheeda, magaalooyinka iyo tuuloooyinka maxalliga ah - waxaan aad u jecelnahay inaan helno meelo aan ku sheekeysanno oo aan ka helno koob shaaha ama kafee ah!

Hilibka Xalaasha ah

Hilibka lagu iibyo dukaamada waaweyn iyo maqaaxiyaha maxalliga ah inta badan maaha hilib xalaal ah. Si kastaba ha ahaatee tiro ka mid ah hiliblayaasha deegaanka ayaa wakhtigan iibya hilibka xalaasha ah haddii aad si gaar ah u weydiiso iyada oo qaar ka mid ah makhaayadaha maxalliga ah ay ku siin karaan cunto xalaal ah.

- **Hibileyaasha Paul:** oo ku yaala: 23 Culmore Rd, Londonderry BT48 8JB
- **Lynas Foodservice:** oo ku yaala Buncrana Road (Chicken and Chicken nuggets)
- **Hibileyaasha Hegarty's:** oo ku yaala 25 William Street, Derry, BT48 6EP
- **Katay's Take Away:** oo ku yaala 52-54 Waterloo Place, Londonderry, BT48 6HF
- **Turkish Kebab & Grill (Takeaway):** oo ku yaala 43 Strand Rd, Londonderry BT48 8LB
- **Chillies Restaurant:** oo ku yaala 145 Strand Road, Londonderry, BT48 7PW
- **Asian Foods & Day Today:** oo ku yaala 4 Foyle Rd, Londonderry BT48 6SR
- **Cedar Restaurant:** oo ku yaala Lebanese Restaurant, 32 Carlisle Rd, Derry, BT48 6JW
- **Spice Land:** (Alaabta qaar ka hubi baakada) oo ku yaala 2A Distillery Brae, Londonderry, BT47 6AN
- **Express Food Service:** (alaabta qaar) oo ku yaala 24N Pennyburn Industrial Estate, Londonderry, BT48 0LU
- **ASTA Polish Shop:** oo ku yaala 79 Spencer Road, Derry, BT47 6AE
- **Basia Polish Shop:** oo ku yaala 35 Abercorn Square, Strabane, Co. Tyrone, BT82 8AQ



Ururada Taageerada

Hoos waxaa ku yaal ururro taageera dadka ka soo jeeda qowmiyadaha tirada yar ee deggan deegaanka Derry iyo Strabane. Ururadani waxay bixiyaan taageero iyo talo, waxaanay ka caawiyaan la-dagaallanka cunsuriyadda, baabi'inta caqabadaha, horumarinta waxbarashadaada iyo dadka kaleba iyo kor u qaadista wacyiga dadweynaha ee ku saabsan xuquuqdaada, dhaqankaaga iyo caadooyinkaaga.

Ururka Islaamka ee Waqooyi-galbeed

NWIA waa urur iskaa wax u qabso ah ama urur bulsho ah oo la aasaasay sanadkii 2012. Inta badan ka faa'iidaystayaasheedu waa xubnaha bulshada Muslimiinta ah ee deggan gobolka Waqooyi Galbeed ee Waqooyiga Ireland. Hay'addu waxay siisaa maclumaad, taageero wax ku ool ah iyo waxqabadyo bulshada Islaamka ah ee Waqooyi-galbeed.

Ciwaanka: **Beerta Ganacsiga Hyde, 3, Pennyburn Industrial Estate, Londonderry BT48 0LU**

Kala xidhiidh: info@nwia.org.uk

Migrant Centre NI

Xarunta Soogalootiga (MCNI) ee NI waxay ka shaqeysaa ilaalinta xuquuqda shaqaalaha soogalootiga ee Woqooyiga Ireland, wax ka qabashada cunsuriyadda, baabi'inta caqabadaha ka dhanka ah shaqaalaha muhaajiriinta ah, horumarinta waxbarashada iyo kor u qaadida wacyiga bulshada ee xuquuqdooda. MCNI waxay ku leedadahay 3 xafiis oo woqooyiga Ireland oo dhan, oo uu ku jiro mid ku yaal Derry-Londonderry. Adeegyada hadda waxaa ka mid ah: Mashruuca caafimaadka maaliyadda iyo fayoobida oo bixiya taageero ay la socdaan faa'iidooyinka daryeelka, adeegga u doodista dembiyada nacaybka jinsiyadeed ee taageeraya dhibanayaasha loo gaystay dembi ku dhisan nacaybka jinsiyadeed, talada socdaalka ee Qorshaha Dejinta Midowga Yurub iyo sidoo kale mashruuca caddaaladda socdaalka kaas oo ku hawlan u doodista, u ololaynta, iyo siyaasadda shaqada u dooda xuquuqda soogalootiga iyo nidaamka socdaalka oo cadaalad ah. La xidhiidh Xarunta Socdaalka ee Woqooyiga Ireland:

Ciwaanka: **The Old Church, Clarendon Street, L'Derry, BT48 7ES**

Websaydka: <https://migrantcentreni.org/> Facebook: <https://facebook.com/belfastmigrantcentre>

Twitter: <https://twitter.com/migrantcentreni> Emayl: advice@migrantcentreni.org

Golaha Muhaajiriinta Waqooyi-galbeed

Hay'ada soogalootiga woqooyi-galbeed (NWMF) waxay ka koobantahay in ka badan 50 mutadawiciin ah iyo 5 shaqaale ah oo waqtibuu x shaqeeya ayaa hormuud u ah hay'adda samafalka ka hortagga cunsuriyadda ee Waqooyi-Galbeed. Tobankii sano ee uu jiray, ururku waxa uu sameeyay barnaamijyo kala duwan oo lagu caawinayo dadka raadinaya badbaadada iyo kuwa la siiyay ilaalinta caalamiga ah, ardayda, iyo runtii qof kasta asal ahaan ka soo jeeda qowmiyad tiro yar oo u yimid inuu ku noolaado kana shaqeeyo aagga DCSDC iyo meelaha ka baxsan. Ururka NWMF waxay bixisaa liis dhamaystiran oo adeegyo ah, oo ay ku jiraan kuwan soo socda: tarjumaano, xiisado Ingiriisi wada hadal ah, la-talin khibradeed oo ku saabsan socdaalka, fursadaha saaxiibtinimada iyada oo loo marayo Hindisaha Kaafiga Bulshada, Talo-siinta Guryaha, Talo-siinta daryeelka iyo calaamadaynta, dhalinyarada iyo barnaamijyada saaxiibtinimo ee qoyska, Waxbarashada iyo tababarka adeegyada, adeegyada dhakhtarka guud, iyo hawlaho bulshada (muusigga, qoob ka ciyarka, cunto karinta, boqashooyinka iwm.).

Kala xidhiidh: **Aynaz Zarif** Ciwaanka: aynaz.zarif@nwmf.org.uk

Ciwaanka: **10 Fountain Street, Londonderry BT48 6QX** Taleefan: **028 7136 2184**

Ururka Bulshada Qowmiyadaha Strabane (SECA)

Ujeedada urukani waa in la aqoonsado oo laga jawaabo baahiyaha dadka ka soo jeeda qowmiyadaha tirada yar iyo in kor loo qaado wacyiga iyo fahamka bulshada deegaanka ee Northern Ireland iyada oo loo marayo hab si tartiib tartiib ah laakiin hubaal ah. Bulshaduna waxay noqotaa bulsho dhaqamo badan leh.

Ciwaan: **2 Abercorn Square, Strabane, Co. Tyrone BT82 8DF**

Emayl: kaminiseca@gmail.com Taleefan: **028 7188 6419**

Xarunta haweenke ee Derry

Xarunta Haweenka ee Derry waa meel ammaan ah oo soo dhaweyn leh oo loogu talagalay haweenka iyo carruurta, xaruntaasi oo bixisa noocyoo kala duwan barnaamijyo ay ka mid yihiin:

- Barnaamijyada dhaqamada kala duwan - saaxiibo samee, hel maclumaad muhiim ah oo horumariya luuqadaada Ingiriisiga.
- Taageerada u doodista carruurta ee carruurta cusub - oo ay ku jiraan naadiga dugsiga kadib.
- Barnaamijyada hooyada iyo dhallaanka iyo taageerada waalidnimada
- Taageerida haweenka si ay u helaan shahaadooyin, u helaan xirfad iyo taageero shaqo.
- Taageerada u doodista xilliga dhalmada
- Caruur da'doodu u dhaxayso 8 toddobaad ilaa 4 sano jir si ay ugu suurtigeliso haweenka carruurta yar yar inay ka qaybgalaan barnaamijyada.

Kala xidhiidh: **Catherine Barr** Emayl: catherinebarr@womencentre.co.uk

Ciwaan: **5 Guildhall Street, L'Derry BT48 6BB** Taleefan: **028 7126 7672**

Adeegyada daryeelka Caafimaadka

Adeegyada Caafimaadka iyo adeegyada daryeelka Bulshada waxaa ugu horayn loogu talagalay inay ka faa'iidaystaan dadka deggan Waqooyiga Ireland. Kuwa codsanaya inay iska diwaan geliyaan dhakhtarka guud ((General Practitioner Practice) waa inay buuxiyaan foomka HSCR-1 si loo qiimeeyo xaqa aad u leedahay helitaanka adeegyada si aad u hesho Kaadhka Caafimaadka.

Foomamka HSCR-1 waxaa laga heli karaa dhakhtarada galliin oo dhan ama adigoo booqanaya websaydkan <https://hscbusiness.hscni.net/1814.htm> oo gujinaya linkigan si aad u soo dejiso foomka tarjuman iyo maclumaaad dheeraad ah. Haddii dhakhtarkaaga guud uu wali u furan yahay qaabiliaada bukaano cusub, markaas waa in aad isdiwiangelisaa, waase haddii aad: (1) ku nooshahay meal 5 mayl u jirta goobta dhakhtarka (2) aan hore laguguug sababo la xidhiidha rabshad aad samaysay iyo (3) waligaa lagaa saarin liiska dhakhtarka guud.



Cusbitaalka ku yaala aagga Altnagelvin

Cisbitaalka Aagga Altnagelvin waa cusbitaal degdeg ah oo bixiya adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan adeeg 24 ah oo ay siiso waaxda shilalka iyo xaaladaha degdeega ah waana mid ka mid ah shanta qaybood ee kansarka loo qoondeeyey ee Waqooyiga Ireland.

Cusbitaalka aagga Altnagelvin

Glenshore Road

Londonderry

BT47 6SB

Websayd: <https://westerntrust.hscni.net/hospitals/altnagelvin-area-hospital/>

Taleefan: **(028) 7134 5171**

Saacadaha ka baxsan saacadaha shaqada ee dhakhtarka guud

Haddii aad u baahan tahay dhakhtar guud saacadaha shaqada ka baxsan (oo ah inta u dhaxaysa 6.00pm ilaa dhakhtarkaaga qaliinku furmo subaxda soo socota) fadlan wac **028 7186 5195**. Wicitaanku wuxuu noqon doonaa mid kala horeeya waxayna kugu wargelin doonaan haddii aad u baahan tahay inaad aragto dhakhtar ama kuugu deeqaan talo caafimaad oo xaga telefoonka ah.

Adeegga degdeg ah

Haddii ay jirto xaalad degdeg ah, fadlan wac **999** oo codso adeegga degdeega ah ee aad u baahan tahay tusaale ahaa: **Ambalaasta, Dab-demiska, Booliska** iyo ciwaanka goobta.

Daryeelka Caafimaadka Ilkaha

Marka aad haysato kaadhka caafimaadka, waxaad iska diiwaan gelin kartaa dhakhtarka ilkaha ee aqbalaya bukaanada cusub.

kaadhka caafimaadku ma daboolo dhammaan daawaynta ilkaha.

Dugsiyada iyo Waxbarashada

Dhigashada dugsigu waa ku qasab carruurta da'doodu u dhaxayso 5 sano iyo 16 sano. Maalmaha dugsigu waxay ka kooban yihiin qyaastii ilaa 6 saacadood, oo ka bilaabmaysa Isniinta ilaa Jimcaha. EA waxa ay mas'uul ka tahay in ay hubiso in si hufan oo waxtar leh adeegyada waxbarashada aasaasiga ah iyo sare ay diyaar ugu yihiin in ay daboolaan baahiyaha carruurta iyo da'yarta, iyo taageerada bixinta adeegyo dhallinyaro oo hufan oo waxtar leh. Maamulka Waxbarashada (EA) wuxuu leeyahay Kooxda Taageerada Magangalyo-doонка iyo Qaxootiga (Kooxda Taageerada ee ASR). Adeegani wuxuu bixiyaa talo, hagitaan iyo taageero uu siiyo dugsiyada iyo waalidiinta iyo ardayda ka socota bulshada magangalyo-doонка iyo qaxootiga.

Ujeedada kooxda taageerada ee ASR waa:

- Horumarinta tayada taageerada waxbarasho ee la siiyo bulshada ASR;
- Bixinta adeeg joogto ah oo la siiyo dugsiyada iyo qoysaska u baahan taageerada ee Waqooyiga Ireland;
- Fududeynta sinnaanta helitaanka laga bilaabo dugsiga barbaarinta ilaa waxbarashada dugsiga hoose ka dambeeya;
- Bixinta macluumaaad iyo hagitaan ku saabsan dariiqooyinka loo maro waxbarasho sare oo dheeraad ah;
- In la dhiso awoodda dugsiyada si ay u daboolaan baahiyaha waxbarasho ee carruurta iyo dhallinyarada ASR;
- Taageerida iyo dhiirigelinta waxbarashada qoyska, saacadaha dugsiga ka baxsan iyo waxbarashada nolosha oo dhan.

Si aad u hesho macluumaaad dheeraad ah fadlan gal websaydka EA's:

<https://www.eani.org.uk/school-management/intercultural-education-service-ies/asylum-seeker-and-refugee-asr-support-team>

Cibaadada

Diinta Masiixiga waa diinta ugu balaadhan ee ay haystaan dadka ku dhaqan Waqooyiga Ireland. Tirakoobkii ugu dambeeyay ee sanadkii 2011, heerka faafitaanka diimaha waaweyn waxay ahaayeen 72.16% Catholic iyo 25.4% Protestant (iyo Diinta kale ee Masiixiga); 1.8% ayaa sheegay in aanay haysan wax diin ah, 0.64% ayaa lagu sheegay in ay haystaan diimo kale. Waxaa jira Hindu, Sikh, Muslim, Buddhist iyo bulshooyinka Yuhuud ah ku sii kordhaya magaaloooyinka Derry iyo Strabane. Derry waxay leedahay gurdwara ku taal xarunta dhaqanka iyo bulshdada ee Sikh oo ku taal 12 Simpsons Brae Derry/Londonderry. Ururka Islaamiga ah ee Waqooyi Galbeed wuxuu ku yaalaa 3 Hyde Business Park Londonderry iyo Xarunta Buddhist ee Potala Kadampa oo ku taal 11 Pump Street ee Magaalada dhexdeeda.

Luuqada Ingiriisida

Waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah dugsiyada luqaddaha ama kulliyadaha hoos ku taxan, si kastaba ha ahaatee tiro ka mid ah kooxaha bulshada ayaa sidoo kale bixin kara xiisado Ingiriisi ah ama xiisado wada sheekaysi oo aan rasmi ahayn.

Dugsiga caalamiga ah ee luuqadaha Foyle

Dugsiga luuqadaha caalamiga ah ee Foyle wuxuu bixiyaa koorsooyin Ingiriis ah oo kala duwan, iyo sidoo kale barnaamijyada horumarinta goobta shaqada iyo tababaro xirfadeed.

Ciwaanka: **Foyle International, 17-21 Magazine Street, Derry, BT48 6HH**

Taleefan: **(+44) 28 71 371 535**

Akademiyada Luuqada English ee Northwest

Dugsi Ingiriisi ah oo bixiya koorsooyin ku saabsan Ingiriisiga guud, Ingiriisiga ganacsiga, iyo Ingiriisiga ujeeddooyin gaar ah.

Ciwaanka: **NW Academy of English Limited, 37 Great James Street, Derry, BT48 7DE**

Taleefan: **(+44) 28 71 370 773**

North West Regional College

Kulliyada Gobolka Waqooyi Galbeed waa kuliyan dadweyne oo bixisa waxbarasho sare iyo waxbarasho dheeraad ah oo loogu talagalay dadka waaweyn. Waxa laga yaabaa inay bixiyaan Fasalo Ingiriisi.

Ciwaanka: **Strand Road, Londonderry, BT48 7AL**

Taleefan: **028 71 276 000**

ESOL NI

Websayd: <https://esolwebapp.azurewebsites.net/>

Sole Purpose Theatre

Shirkadan tiyaatarka waxay dadka cusub siisaa kafeteeriyo wada sheekaysi oo loogu tala galay si ay ugu wada hadlaan Ingiriis xiliga ah joogaan goobaha bulshdada ee aan rasmiga ahayn.

Ciwaanka: **The Playhouse, Artillery Street, Derry, BT48 6RG**

Taleefan: **028 71 279 918**



Adeega talo bixinta

Waxaa jira saddex talo-bixiyeyaa oo ugu waaweyn gudaha magaaloooyinka Derry iyo Strabane. Waxay siiyaan talo bilaash ah, sir ah, dhexdhexaad ah oo tayo sare leh qof walba iyadoon loo eegayn kartida, da'da, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, midabka, diinta, ra'yiga siyaasadeed, nooca galmaada iyo heerka bulsho ama dhaqaale. Qaar ka mid ah mawduucyada ay daboolayaan adeegyada la-talinta waa sida soo socota:

- **Caafimaadka**
- **Hoyga**
- **Daymaha iyo lacagta**
- **Socdaalka**
- **Qoyska**
- **Isticmaalka alaabta**
- **Sharciga iyo maxkamadaha**
- **Shaqada**

Faahfaahinta xidhiidhka ka eeg halkan hoose:

Advice North West

5th Floor, Embassy Building
3 Strand Road, Derry BT48 7BH
Freephone **0300 3033 650**

17 Dock Street
Strabane BT82 8EE
Freephone: **0300 3033 650**

Websayd: www.advicenorthwest.com

Emayl: advice@advicenorthwest.com

Talobixinta daymaha: debtadvice@advicenorthwest.com

Dove House Community Trust

32 Meenan Square,
Derry BT48 9EX
Taleefan: **028 71 269 327**
Emayl: donnadovehouse@gmail.com
Websayd: www.dovehousecommunitytrust.org

Resource Centre Derry

Carnhill
Derry BT48 8BA
Taleefan: **028 71 352 832**
Emayl: jude@resourcecentrederry.com
Websayd: www.resourcecentrederry.com

Law Centre NI

Belfast
Taleefan: **028 9024 4401**
Websayd: <https://www.lawcentreni.org/>

Afeef

Xogta ku jirta buug-yarahani waxay ahayd sax markii la daabacay. Wuxaan ku dadaali doonaa inaan hubinno in macluumaadka la hayo oo la ilaaliyo ilaa maantadan



